Adeegyada Maxkamada oo dhibanayaasha

Ku caawinta dhibanayaasha dhinaca nidaamyada maxkamada.

Adeegyada Maxkamada oo Dhibanayaasha waa adeeg xor ah oo qarsoodi ah oo kaa caawinayo ka qeybqaadashada nidaamka maxkamada. Waxaa laga heli karaa maalinta koowaad ee maxkamada eedeysanaha, illaa laga xukumayo iyo inta lagu jiro racfaan walba.

Adeegyada waxaa gaarsiiyo la taliyayaasha dhibanaha, oo ku taqasusay gaarsiinta adeegyada ee dhibanayaasha dambiga. Caadi ahaan isla la taliyaha dhibanaha ayaa loo xilsaarayaa illaa laga baxayo dacwada oo dhan. La taliyaha dhibanahaaga ayaa kugu caawin karo isaga oo:

- kaala talinayo wax ku saabsan xaquuqahaaga quseeyo Xeerka Xaquuqaha Dhibanaha 2002
- warbixin siinta ku saabsan dacwadaan
- kugu caawinayo ka qeybqaadashada nidaamka maxkamada.

Ma ahan adeega la talinta; taageerada dareenka waxaa lagaaga heli karaa hay'adaha.

Sidee ayay la taliyayaasha dhibanaha kuu caawin karaan

LA TALIYAHAAGA DHIBANAHA WUXUU:

- sharaxi karaa sida nidaamka maxkamada u shaqeeyaan iyo waxa erayada gaarka laga wado
- kuu sheegaa wax ku saabsan adeegyadeena, xaq u lahaanshooyinka iyo caawinta dhaqaalaha
- kusoo wargeliyo waxa ka dhacayo dacwadaada
- hubiyaa in Booliska iyo kuwa kale ee ku xiran dacwadaada way ogyihiin wax ku saabsan walaacyadaada
- kuu sheego waxa taageero iyo illaalada la heli karo haddii aad ka walaacsantahay badbaadadaada (ama qoyskaaga)
- ku siiyo warbixin ku saabsan soo celinta cadaalada.

WAY KU CAAWIN KARAAN INTA LAGU JIRO DHAGEYSIGA:

- kugu caawiyo inaad u sheegtid maxkamada sida dambiga kuu saameeyay
- kugu caawiyo u diyaarinta maxkamada haddii aad tahay marqaati
- waxbarida marqaatiyadaada wax ku saabsan nidaamka maxkamada iyo doorkooda ku aadan
- kala talinta dhibanayaasha xadgudubka galmada ee ku saabsan qaabab kale oo cadeyn loogu bixiyo maxkamada
- kugu caawiyo inaad u sheegtid maxkamada sida aad ka dareentay joojinta magaca iyo damaanada.

KADIB DHAGEYSIGA, WAXAY KUGU CAAWIN KARAAN:

- sharaxaada sharuudaha damaanad walba iyo go'aamada kale ee uu sameeyay garsooraha
- kugu caawiyo in laguu soo celiyo alaabahaaga haddii loo isticmaalay cadeyn ahaan
- sharaxayo sida laguu sheegi karo markii dambiilaha looga siideynayo xabsiga siideynta sharuuda, ee xabsiga guriga ama xarunta caafimaadka maskaxda oo illaalsan.

Gelitaanka adeegyada soo celinta cadaalada

Waxaa kuu suurtogeli karto inaad ka qeybgashid shirka soo celinta cadaalada haddii dacwada ay ku jirto degmada ama maxkamada sare. Shirka soo celinta cadaalada waa kulan la fududeeyay ee lagu qabtay meel badbaado ah oo u dhaxeyso dhibanaha, dambiilaha iyo labada dadkooda taageerayo, iyo fududeeyaha waaya aragga ah.

Shirka wuxuu ku siiyaa fursad loogu sheego dambiilaha sida dambiga kuu saameeyay adiga iyo sida waxyeelada loo saxi karo.

Bayaanada saameynta dhibanaha ee maxkamada

Sida dhibane, waxaad xaq u leedahay inaad u sheegtid maxkamada sida dambiga kuu saameeyay. Kan waxaa loo yaqaan bayaanka saameynta dhibanaha (VIS). Booliska ayaa kugu caawinayaan diyaarinta bayaankaaga. VIS waxaa caadi ahaan loogu soo bandhigaa maxkamada qoraal ahaan, laakin waad heli kartaa in lagu aqriyo bayaankaaga maxkamada. Nafsadaada ayaad u aqrin kartaa, weydii qof kale inuu kuu aqriyo, ama horay loo duubay.

Haddii aad rabtid inaad sameysid kuwa ka mid ah waxyaabahaan, waa inaad sarkaalka booliska ee masuulka ka ah dacwadaada u ogaadaa sida ugu dhaqsiha abadan oo suurtogalka ah. Haddii aadan ku qanacsaneyn la macaamilida booliska, la taliyaha dhibanahaaga ayaa iyaga ku weydiin karo.

Markii aad xukumeysid dambiile, garsooraha dhoor waxyaabo ayuu tixgeliyaa, oo ay ku jiraan VIS-kaaga, wargelinada ku saabsan qofka lagu xukumay oo loo taxaabay dacwado la mid ah.

Xaquuqahaaga

Waxaad xaq u leedahay in wax lagaaga sheego adeegyada adiga ku caawin karo, lagula socodsiiyo hormarka dacwada oo dhinaca maxkamada iyo ogaanshaha waxa la filanayo markii aad maxkamad aadid. Dacwadaha qaarkood, adiga ama wakiilkaaga wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka dhaho waxyaabaha sida joojinta magaca, damaanada, xabsiga guriga ama siideynta sharuuda.

Waxaad filan kartaa ixtiraam, naxariis iyo adeeg ixtiraamsan ee saraakiisha maxkamada, booliska iyo qof walboo kale ee ku lugleh dacwada. Waxaad xaq u leedahay qarsoodi.

Aqri Xeerka Dhibanayaasha si aad wax badan uga ogaatid xaquuqahaaga iyo daaweynta aad filan kartid. Waxay ku taalaa webysaydkeena - fiiri ciwaanka ka soo horjeedo. Haddii aad u maleyso in xaquuqahaaga aan la buuxin, ama aadan helin heerka adeega aad filaneysay, waxaad sameyn kartaa cabasho.

Si aad ula xiriirrid La taliyaha Dhibanaha Maxkamada, ka soo wac Warbixinta Dhibanayaasha **0800 650 654**, 9am illaa 5pm, Isniinta illaa Jimcaha.

Si aad u aqrisid Xeerka Dhibanayaasha, booqo onleenka **victimsinfo.govt.nz/support-and-services/dhibanayaasha-xaquuqaha/**

Si aad wax badan uga ogaatid soo celinta cadaalada, weydii La taliyaha Dhibanaha Maxkamada ama booqo onleenka **victimsinfo.govt.nz/the-court-process/the-verdict/restorative-justice-services/**

MOJ0071_NOV18